



## Ardayda Astor oo qabanqaabiyay dhacdadii u horreysay dugsiga ee Maalinta Dhulka

Isbedelka dhanka cimilada ayaa ahaa hadal hayna ugu badan markii ardayda Astor ay qabteen dhowr dhacdooyin si ay aqoonsadaan Maalin Dhulka ee Isniinta, Abriil 22. Ardayda awoodi waayay in ay ka qayb qaataan dhacdada ardayda caalamiga ah ee isbedelka dhanka cimilada ee bishii la soo dhaafay ayaa codsatay in ay wax u sameeyaan Maalinta Dhulka waxayna qabanqaabiyeen hawlo kala duwan.

"Tani waa habkooda ay uga qayb qaadanayaan," ayay sheegtay Maamule Sarah Zabel.

Ardayda fasallada toddobaad iyo sideedaad ayaa qoray buug ku saabsan noolaha sii dabar go'aya 'endangered species' waxayna u akhriyeen ardayda K-2 intii lagu jiray subaxnimada. Saacadii qadada ka dib, ardayda dugsiga dhexe ee dugsigu leeyahay ayaa aaday cawska bannaanka ku yaala 'lawn' si ay u abaabulaan fadhi dhulka la fariisanayo, oo ay la socdaan heeso iyo daqiiqad aamusnaan ah. Ardaydu waxay sidoo kale qaadeen qashin ku wareegsanaa dugsiga.

"Waxaanu rajeynaynaa in aan tani caado ka dhigno", ayay sheegtay macallimada Luqadda Farashaxanka ee Suzanne Germaneri, oo gacan ka geysatay isku duwida dhacdada.

[Fiiri sawirro buuxa oo ka socda dhacdada](#)